# XUQUUQAHA DHIBBANAHA DANBI-HELISTA KA DIB

## OGEYSIINTA SIIDEYNTA

Xukunka danbi-helista ka dib, dhibbaneyaasha danbiga waxay xaq u leeyihiin in ay helaan ogeysiinta qofka maxbuus ah marka laga sii deynayo jeelka, goobta lagu hayo, ama dhismaha (xabsiga) Minnesota Department of Corrections (Waaxda Asluubta ee Minnesota ama DOC) (xabsi). Siideynta ogeysiintan ma aha mid toos la isugu soo sheego—ee waa in ay dhibbaneyaashu codsadaan ogeysiinta siideynta qofka xiran. Ogeysiiska waxaa la soo sheegi doonaa markay jirto siideyn (sida in maalintii shaqo loo sii daayo iyo in loo kordhiyo muddo ah shaqa-ka-joojin), marka qofka loo wareejiyo xarun ilaalinteedu hooseyso, iyo haddii uu qofka maxbuuska ah baxsado ama dhinto.

### Siideynta jeelka deegaanka

Si ay u helaan ogeysiinta siideynta qofka ee jeelka deegaanka, **waa in ay dhibbaneyaashu qoraal ahaan si toos ah uga soo codsadaan** xarunta xabsiga. Dhibbaneyaashu waxay la xiriiri karaan jeelka si ay u ogaadaan sida loo sameysto codsiga.

Dhibbaneyaashu waxa ay sidoo kale iska diiwaangelin karaan VINE (Victim Information and Notification Everyday) (Macluumaadka Dhibbanaha iyo Ogeysiinta Maalin kasta), oo waa adeeg si toos ah dhibbaneyaasha loogu soo ogeysiiyo taleefan ahaan, qoraal ahaan, iyo/ama boostada intarnetka marka danbiilaha laga sii daayo xabsiga.

### Siideynta qofka ee xabsiga DOC

Ogeysiinta siideynta ah ee laga helayo xabsiga DOC, **waa in ay dhibbaneyaashu ka codsadaan** Minnesota Haven, oo ah adeeg loogu hayo barta intarnetka ee DOC. Dhibbaneyaasha waxaa la soo ogeysiin doonaa siideynta xaalka qofka xiran, marka loo wareejiyo goob ilaalinteedu hooseyso, baxsasho, dhimasho, iyo siideyn kasta oo ku xigta haddii qofku dib u soo galo xabsiga.

Dhibbaneyaasha danbiyada daran waxay soo codsan karaan macluumaad dheeraad ah iyo ogeysiin haddii danbiilaha uu noqdo mid lagu sunto ogeysiinta heerka khatarta bulshada.

Iyada oo la soo marayo Minnesota Haven, dhibbaneyaashu waxay fikrad ka dhiiban karaan qorshaha danbiilaha mar kale la sii deynayo, in ay helaan caawin ah qorsheynta badqabka, iyo in ay codsadaan inay ka qeybqaataan habraacyada hagaajinta caddaaladda.

Dhibbaneyaasha dadka xiran ee lagu soo helay danbi la xiriira tacadiga qoyska gudihiisa waxay soo codsan karaan in lagu soo ogeysiiyo shanta lambar ee boostada deegaanka ama sibka meesha qofku ku noolyahay isla marka ama ka dib marka laga sii daayo xabsiga DOC.

Duruufaha qaarkood, qofka xiran waxa laga yareyn karaa muddada xabsiga ama in korka lagala socdo siideynta ka dib marka lagu arko edab fiican oo loo tixgelin karo. Dhibbaneyaashu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan haddii uu qofka la xiray xaq u leeyahay barnaamijka tixgelinta edebta iyo in ay fikrad ka dhiibtaan qorshaha baxnaaninta qofka xiran.

## BAROOBEYSHANKA AMA SIIDEYNTA KORKA LAGALA SOCONAYO

Ogeysiiska siideynta dhibbanaha waa inay ku jirto shuruudaha siideynta danbiilaha iyo magaca sarkaalka baroobeyshanka ee danbiilaha ama wakiilka ama xafiiska qofka ka warhayn doona. Danbiileyaasha DOC ee lagu siidaayo in la korka laga socdo, magaca wakiilka qofka ka warhaynaya waxaa laga heli karaa bogga "Raadinta Danbiilaha" ee barta intarnetka ee DOC.

Dhibbaneyaashu waxay xaq u leeyihiin in ay ogaadaan shuruudaha baroobeyshanka ama siideynta laga warhaynayo. Macluumad badan oo gaar ah, sida cinwaanka danbiilaha, goobta shaqada, iyo natiijooyinka qiimeynta cilminafsiga, kama mid aha waxyaabaha lala wadaagi doono dhibbanaha.

Dhibbaneyaashu waxay xaq u leeyihiin in ay ogaadaan haddii uu danbiilaha u hoggaansamo shuruudaha siideynta ama in laga warhayo, hase yeeshee, toos looma soo ogeysiin doono marka qofku shuruudaha u hoggaansami waayo. Warbixinta dhibbanaha ee u markuu hoggaansami waayo shuruudaha waxaa loo gudbin karaa sarkaalka baroobeyshanka ama wakiilka kormeerka. Faldanbiyeedka waxaa loo sii sheegi karaa xafiiska booliiska ee ku habboon. Xadgudubyada ah baroobeyshanka ama shuruudaha ah siideynta la iska warhayo ma sababi karaan in lagu laabto jeel ama xabsi.

Dhibbaneyaashu ma laha xuquuq sharciyeed oo lagu soo ogeysiinayo marka uu danbiilaha jebiyo shuruudaha baroobeyshanka. Hase ahaatee, dhibbaneyaashu waxay la xiriiri karaan wakiilka baroobeyshanka oo ay ku wargelin karaan in ay rabaan dacwooyinka qofka loogula noqonayo baroobeyshanka. Dhibbaneyaasha, sida xubin kasta oo dadweynaha ka mid ah, waxay ka qeybgeli karaan dacwad-dhageysiga qofka loogala noqonayo baroobeyshanka.

Waxaa jirta muddo ku xadeysan shan sano ah oo uu dadka ugu egyahay baroobeyshanka. Dhibbaneyaashu waxay had iyo jeer la xiriiri karaan xafiiska xeer-ilaalinta si ay u hubsadaan dhammaadka taariikhda baroobeyshanka.

Inta uu qofku ku jiro baroobeyshanka ama laga warhaynayo, dhibbaneyaashu waxay kala xiriiri karaan sarkaalka baroobeyshanka ama wakiilka kormeerka oo ay su'aalo ka weydiin karaan sida uusan qofku ugu hoggaansameyn shuruudaha baroobeyshanka ama kormeerka, isbeddelka xaalka, codsiyada xadgudubka iyo dacwadaha socda, iyo wixii kale oo ah walaac kasta oo ku saabsan danbiilaha.

### Baroobeyshanka aan laga warhayn doonin

Danbiileyaasha baroobeyshanka ku jira qaarkood "lama kormeero," taas macnaheedu waa in aan wakiil gaar ah loo xilsaarin, laakiin dembiileyaasha qaar ayey maxkamaddu kormeertaa. Habkaas waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa "baroobeyshanka maxkamadeed." Si loogala hadlo walaacyada danbiileyaasha, dhibbaneyaashu waxay la xiriiri karaan xafiiska baroobeyshanka ama waaxda asluubta ama xeer-ilaalinta si ay ugu sheegaan haddii ay jiraan xadgudubyo ah baroobeyshanka oo ay tahay in ay ogaato maxkamadda.

### Wareejinta kormeerka

Danbiileyaasha ku nool ama raba in ay ku noolaadaan gobol kale waxay codsan karaan in kormeerka lagu sameeyo loogu wareejiyo gobol kale. Si loo go'aamiyo haddii ilaalinta danbiilaha loo wareejiyey gobol kale ama dib loogu soo celiyay Minnesota, ka eego www.interstatecompact.org oo ka baaro astaanta "ICOTS" hoosteeda.

### Joojinta baroobeyshanka ee goor hore

Danbiilaha ku jira baroobeyshanka waxa uu xaq u yeelan karaa in goor hore laga joojiyo baroobeyshanka haddii uu ka soo baxo shuruudaha qaarkood. Ogeysiinta dhibbanaha looma baahna, laakiin dhibbanuhu waxa uu weydiin karaa sarkaalka asluubta haddii danbiilaha goor hore laga joojin karo ilaalinta.

## QAANBIXID

Haddii qofka ku jira baroobeyshanka uusan ugu soo qaanbixin sida ku cad qorshaha lacagbixinta, dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu codsado dacwad-dhageysiga mar labaad lagu eegayo baroobeyshanka iyagoo la xiriiraya xeer-ilaaliyaha ama sarkaalka ciidanka asluubta. Intaa waxaa dheer, sarkaalka asluubta ayaa codsan doona dibu-eegis ah dacwad-dhageysi haddii uu barooneyshanku ku dhacayo ilaa 60 maalmood oo uusan qofku soo qaanbixin.

## MASIXIDDA FEYLKA DANBIYADA

Dadka danbiyada lagu helo waxay soo xareysan karaan codsi ah in laga masaxo diiwaanka ka qoran ee xiritaanka iyo danbiyada lagu helay. Marka diiwaanka la masaxo, feylka waa la xirayaa, oo dadweynuhu ma arki karaan. Dhibbaneyaashu waxa ay xaq u leeyihiin in lagu soo wargeliyo dacwadaha laga masaxay, in laga helo talo, iyo in lagu wargeliyo natiijada. Si loo helo ogeysiintan, **dhibbanuhu waa in uu codsi qoraal ah u soo dirsado** xafiiska xeer-ilaalinta.

### Masaxaadda lagu heshiiyo

Xaaladaha qaarkood, xeer-ilaaliye ayaa oggolaan kara danbiyada qof laga masaxayo iyada oo uusan eedeysanuhu codsi u soo gudbin. Ka hor intaan la oggolaan in la xiro diiwaanka, xeer-ilaaliyaha waa in uu sameeyo dedaal si daacadnimo leh loogu ogeysiinayo dhibbanaha danbiga wax loo oggolaaday iyo fursad loo uga soo horjeesan karo.

### Masaxaadda danbiyada ee toos ah

Waxaa jira danbiyo iyo xaalado gaar ah oo danbiga la isku helay si toos ah looga masaxo eedeysanaha. Haddii uu danbiilaha qirto danbiga iyadoo loo raacayo heshiiska qirashada ah ee eedeymaha oo uu xaq u yeesho masaxaad toos ah, xeer-ilaaliyaha ayaa dhibbanaha ogeysiin doona.

## BALLANQAADKA MADANIGA AH'

### Codsiga ballanqaadka madaniga ah

Dhibbanaha waxa uu xaq u leeyahay in lagu wargeliyo marka uu xafiiska qareenka degmada u xareeyo codsi ah in uu danbiiluhu si madani ah ballan ugu galay xarunta dabiibka. Intaas waxa sii dheer, dhibbanuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka soo qeybgalo dacwad-dhegaysi kasta oo danbiga la xiriira, in lagu soo wargeliyo natiijada codsiga, iyo in lagu soo wargeliyo habka codsiga ogeysiinta ee xarunta dabiibka ee xaaladda isbeddelka haddii ay qofka ka go'an tahay.

### Heerka isbeddelka iyo siideynta

Haddii ay qofka si madani ah uga go'an tahay xarunta dabiibka, dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay in lagu wargeliyo isbeddelka xaaladda qofka, sida wareejinta, siideynta meelgaarka ah, siinta fasax ama qorshe ah meel-aadis, ama haddii loo sii daayo si ah meelgaar ama joogto. Ka hor heerka isbeddelka, madaxa xarunta waa in uu dhibbanaha ogeysiiyo xaqa uu u leeyahay inuu soo gudbiyo bayaan qoran oo ah soojeedinta laalista ama qorshaha siideynta. Si loo helo ogeysiintan, **dhibbaneyaashu waa in ay codsi qoraal ah u soo gudbiyaan** madaxa xarunta meesha uu qofku ku xiran yahay.

*Xeer-ilaaliyeyaasha ayaa dhibbaneyaasha ogeysiinaya xuquuqdooda ka dib marka danbi lagu helo iyadoo loo eegayo Sharciyada Minnesota Cutubka 611A.*

## RACFAAN

Xafiisyada xeer-ilaaliyeyaasha waxaa laga rabaa in ay dhibbaneyaasha ogeysiiyaan racfaanka. Ogeysiintan waa mid toos ah; dhibbaneyaasha lagama rabo in ay codsi gaar ah u sameystaan. Dhibbaneyaasha waa in la soo ogeysiiyo arrimaha la isku hayo, habraaca, dacwad-dhageysiyada loo ballansan yahay, xuquuqdooda, iyo natiijada.

## BEDDELAADDA XUKUNKA

Waxaa jira xaalado qaarkood laga yaabo in ay maxkamaddu tixgeliso wax laga beddelayo xukunkii asalka ahaa ee eedeysanaha, tusaale ahaan, sida loo saxo xukunka, marka eedaysanaha dib loogu xukumo natiijada rafcaanka, ama marka uu xeer-ilaaliyuhu rabo juusteynta xukunka. Xaaladahaas oo kale, xeer-ilaaliye waxaa looga baahan yahay in uu dhibbanaha ogeysiiyo dacwadaha, xuquuqda ah in uu goobjoog ka ahaado dacwad-dhageysiga, iyo xuquuqda ah in uu maxkamadda ka dhiibto fikrad la xiriirta waxa laga beddelayo ama juusteynayo xukunka.

## CAFIS

Marka uu qof codsado cafis, waa in dhibbanaha la ogeysiiyo codsiga, dacwada socota ee la dhageysan doono, iyo xuquuqda uu dhibbanuhu u leeyahay in uu ka soo qeybgalo dacwada iyo in uu soo gudbiyo bayaan ah hadal ama qoran. Cafiska waxaa ka mid ah xabsiga oo la iska saaro, dibu-dhigista xukun la riday, ama dhimista xukunka horay u ahaa mid ciqaabeed.

## XABSI DAA'IN

DOC waa in ay dhibbanaha ogeysiiso danbiga dadka lagu xukumay ee ah xabsi daa'in ee noqday siideyn shuruudeysan ama dacwad-dhageysiyo ah siideynta la kormeerayo. Dhibbanuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka soo qeybgalo dacwad-dhageysiga dibu-eegista si uu fikrad uga dhiibto, hadal ahaan ama si qoran. Hadalka dhibbanaha waa in la tixgeliyo marka la sameynayo siideynta shuruudeysan ama go'aanka ah siideynta la kormeerayo.

## BADQABKA DHIBBANEYAASHA

**Si loo caawiyo:** Dhibanayaasha danbiyada gacan ka hadalka ee aan weli raadsan caawimaad ah adeegga dhibbanaha waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay codsadaan si ay u helaan hagid ah qorsheynta badqabka iyo si ay u soo kabsadaan. Diiwaanka meelaha adeegga dhibbanaha waxaa laga heli karaa Barta Intarnetka ee OJP.

**Barnaamijka qarinta cinwaanka:** Safe at Home waa barnaamij qariya cinwaanka oo loogu talagalay dadka ka soo badbaaday tacaddiga qoyska gudihiisa, xadgudubka galmada, dabagalid ah dhibaateyn, iyo dadka kale ee u baqaya badqabkooda. Barta intarnetka ee Minnesota Secretary of State (Xoghayaha Gobolka Minnesota) ayaa laga helayaa macluumaadka barnaamijka iyo ururrada deegaanka ee lala xiriirayo si loo codsado.

**Baaritaan qarsoodi ah:** Xadgudubka galmada ah ee dhibbaneyaasha danbiga ee laga yaabo in ay soo gaartay shahwada ama dhiigga danbiilaha waxay sameyn karaan codsi qarsoodi ah, ka dib marka danbiga qofka lagu helo, iyadoo loo marayo xafiiska xeer-ilaalinta si danbiilaha looga baaro faayruska aaydhiska ee HIV iyo si loo helo natiijada baarista.

**Jebinta amarrada difaacidda:** Dadka xabsiga ku jira, jebinta amarrada difaacidda madaniga ah iyo amarrada ciqaabta ee ah in aan qof lala xiriirin waxaa loo sheegi karaa booliska deegaanka dhibbanaha iyo jeelka ama xarunta xabsiga asluubta.

**Kordhinta amarrada difaacidda:** Dhibbaneyaasha haysta amar ah difaacid oo ka dhacsan ama ka dhici doona inta uu danbiiluhu ku jiro jeelka ama xabsiga waxa ay maxkamadda ka soo codsan karaan amar cusub xataa haddii uusan danbiiluhu ku sameyn hanjabaad cusub ama falal cusub oo ah gacan ka hadal.

**Diyaarinta siideynta:** Ka hor siideynta, dhibbaneyaasha danbiile ku jira xarunta DOC (xabsi) waxa ay la xiriiri karaan maamulaha kiiska qofka xiran ama Victim Assistance and Restorative Justice Unit (Qeybta Caawinta Dhibbanaha iyo Caddaaladda Qaanbixinta) si ay ugala hadlaan wixii walaac ah oo la xiriira badqabista iyo si ay fikrad uga dhiibtaan qorshaha siideynta ama shuruudaha. Maamulaha kiiska agtiisa waxaa ku qoran macluumaadka kale ee danbiilaha ee bogga "Helista Danbiilaha" ee Barta intarnetka DOC.

*Ogeysiinta dhibbaneyaasha qaar ka mid ah ma bilaaban doonaan ilaa iyo sannado ka dib marka danbiga la isku helo. Dhibbaneyaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay hubiyaan sida ay kula soo xiriiri karaan xafiisyada khuseeya ee ay ka heli doonaan ogeysiin kasta marka danbiga la xukumo ka dib.*

## Tasiilaadyo

### Macluumaadka Xaalka Maxbuuska

VINE (Victim Information and Notification Everyday)
(Macluumaadka Dhibbanaha iyo Ogeysiinta Maalin kasta)
www.vinelink.com
877-664-8463 | TTY: 866-847-1298
Helista Danbiilaha ee DOC: www.doc.state.mn.us

### Codsiga Ogeysiinta Siideynta

Jeelalka: La xiriir jeelka deegaanka iyo/ama isticmaal VINE
www.vinelink.com | 877-664-8463
Xarunta DOC:
victimassistance.doc@state.mn.us | 800-657-3830

### Department of Corrections Victim Services and Restorative Justice (Waaxda Asluubta ee Adeegyada Dhibbanaha iyo Caddaaladda Qaanbixinta)

victimassistance.doc@state.mn.us
800-657-3830
mn.gov/doc/victims

### Kaalmo Dhaqaale

Minnesota Crime Victims Reimbursement Board (Guddoonka Lacagcelinta Dhibbaneyaasha Danbiga ee Minnesota)
Barnaamijyada Office of Justice (Xafiiska Caddaaladda)
ojp.dps.mn.gov
651-201-7300 | 888-622-8799
Su'aalaha qaabixidda, kala xiriir xeer-ilaaliyaha ama DOC Victim Services and Restorative Justice Unit (Qeybta Adeegyada Dhibbanaha iyo Caddaaladda Qaanbixinta).

### Helista Diiwaanka Kiisaska Dadweynaha

Barta intarnetka Minnesota Judicial Branch (Waaxda Garsoorka Minnesota)
www.mncourts.gov/publicaccess

### Barnaamijka Qarinta Cinwaanka

Safe at Home
Minnesota Secretary of State (Xoghayaha Gobolka Minnesota)
www.sos.state.mn.us
safe.athome@state.mn.us
651-201-1399 | 866-723-3035

### Tasiilaadyada Dhibbanaha

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda iyo tasiilaadka dhibbanaha, booqo Barta Intarnetka ee OJP oo ah ojp.dps.mn.gov 9-23

Post Conviction - Somali

# Ka-dib Marka Danbi La Isku Helo

## Xuquuqda dhibbanaha iyo macluumaadka



Xafiiska Barnaamijka Caddaaladda
Waaxda Ammaanka Guud ee Minnesota
Office of Justice Programs
Minnesota Department of Public Safety